

Ma leedahay caabuq?

Ogow khatarta aad ugu jirto in xanuunka sepsis kugu dhaco

Waa maxay sepsis?

Xanuunka sepsis wuxuu yimaadaa marka jidhku uu jawaab aad u daran ka bixiyo caabuqa. Sebsiisku wuxuu waxyeelleeyaa qaybo badan oo jirka ah sida wadnahaaga iyo sambabadaada wuxuuna keeni karaa dhimasho.

Sepsis waa xaalad caafimaad oo degdeg ah. Fursada ugu wanaagsan ee aad kaga soo bogsan karto xanuunka sepsis waa in si dhakhso ah loo daaweeyaa.

Calaamadaha xanuunka sepsis



Neefsasho boobsiis ah ama neefta oo kugu dhagan



Qandho iyo qarqaryo



Wadno-garaac boobsiis ah



Heerkulka jidhka oo hooseeya



Shuban



Kaadida oo yaraata amaba kaadi la'aan



Lalabo iyo matag



Daal cusub, jahawareer, hurdo ama isbeddel dabeecad



Xanuun ama 'dareen ka xun sidii hore'

Maxay yihiin waxyaabaha aan u baahanahay inaan la socdo?

Infekshan/caabuq kasta wuxuu keeni karaa xanuunka sepsis.

Infekshannada intooda badani ayagaa iskood isaga reysta, laakiin waxaad u baahan tahay inaad ogaato waxaad samaynayso haddii calaamaduhu si dhakhso ah uga sii daraan.

Markuu kugu dhaco xanuunka sepsis, waxaa laga yaabaa inaad aad u jirato - si aadan waliga u xanuunsan, si kaduwanjirooyinka caadiga ah.

Maxaan sameeyaa haddii aan walwalayo?

Haddii aad u malaynayso in adiga ama qof aad jeceshahay uu qabo xanuunka sepsis, ku kalsoonoow waxa naftaada kuu sheegayso, wac lambarka Saddexda Ebar (000) ama si toos ah u aad isbitaalka oo weydii dhakhtar ama kalkaalisada, 'Malaga yaabaa in xanuunka i haya uu sepsis yahay?'

Waa caadi hadii aad dib ugu laabato, xitaa haddii aad hore u tagtay dhakhtarka.



Haddii aadan hubin, wac **13 HEALTH (13 43 25 84)** xilli walba waana lacag la'aan, waxaadna talo kahelaysaa kalkaaliso diiwangashan iyadoona ay wax walba sir kuu ahaanayaan

Xanuunka sepsis kuu ku dhici karaa?

Xanuunka sepsis wuxuusaameynkaraa qof walba, xataa da'yarta iyo dadka caafimaadka qaba. Dadka qaar ayay aad u badan tahay inuu ku dhaco xanuunka sepsis marka loo eego dadka kale. Waxaa laga yaabaa inaad halis dheeraad ah ugu jirto haddii:

- aad ka weyn tahay 65 sano
- difaaca jirkaaga uu daciifo
- aad dhawaan qalliin gashay
- aad uur leedahay ama aad dhawaan dhashay
- aad kasoo jeedo qowmiyadaha Aboriginal ama Torres Strait Islander
- cudurka kansarka lagaa daaweynayo
- aad leedahay dhitooyin kale oo caafimaad
- jirkaagu gubtay ama ay wax ku sareen ama aad leedahay dhaawac
- uu kugu dhacay COVID-19
- uu hore xanuunka sepsis kuugu soo dhacay
- aad tahay ilmo ka yar 1 sano.

Ma garan lahayd goorta loo baahan yahay inaad is weydiiso su'aasha ah – 'Malaga yaabaa in waxani yahay xanuunka sepsis?'



Daawo muuqaalkan 1-daqiiqo ah si aad wax badan uga ogaato xanuunka sepsis

Sida looga hortagi karo xanuunka sepsis?

Sida ugu wanaagsan ee looga hortagi karo sepsis waa in laga fogaado caabuqa. Saas waxaad u samayn kartaa:



adoo la hadla dhakhtarkaaga
haddii aad xanuunsan tahay



adoo qaadanaya tallaalladaada xilliyada loogu talagalay



nadiifiya meelaha jirkaaga ee ay wax sareen faashad na saarayainta ay ka reysanayaan



adoo dhaqaya gacmahaaga wax badan



adoo la soconaya calaamadaha infekshanka iyo xanuunka sepsis.

Mahadnaq

Waxaa laga soo qaatay Shabakadda Sepsis ee Australia (Australian Sepsis Network), Xarumaha Xakamaynta iyo Kahortagga Cudurrada (Centres for Disease Control and Prevention), iyo Bulshada Australiyaanka ee Cudurada Faafa (Diseases).

Cudurdaar

Xaashidan macluumaadka waxay ka dhigan tahay oo keliya in loo isticmaalo qaab aqoon kororsi ee looguma talogelin in lagu badesho taladii ay bixin lahaayeen xirfadlayaasha caafimaadka. Xaashidan macluumaadka waa mid hada la tijaabinayo. To provide feedback please Si aad ra'yigaaga noola wadaagto fadlan iimayl noogu soo dir sepsis@health.qld.gov.au.